



War saxaafadeed

Deeqaha dhaqamada kala duwan oo shaqeynaya

Abriil 08, 2025 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan ee Alberta wuxuu taageeraa dadaallada bulshada ku saleysan ee isdhexgalka dhaqamada kala duwan guud ahaan gobolka.

Dowladda Alberta waxay ka go'an tahay in ay horumariso gobol ay dadku ka kala yimaadeen dhaqammo kala duwan laguna qiimeeyo lagana ixtiraamo. Mid ka mid ah siyaabaha tan lagu gaarayo waa Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan, kaas oo taageera bulshooyin isdhexgal leh oo soo dhawayn badan. Miisaaniyadda 2025 waxay u qoondaysay \$12 milyan saddex sano gudahood si loo sii wado kor u qaadidda fahamka iyo is-dhexgalka dhaqamada, iyadoo la xusayo lana taageerayo kala duwanaanshaha dhaqameed iyo dhaqamada Asaliga ah (Indigenous).

"Alberta waxaa ka buuxa bulshooyin firfircoon oo dhaqamo kala duwan leh, deeqahanina waxay taageeraan hindisayaasha ay bulshada lafteedu hoggaaminayso, kuwaas oo siinaya kooxo dhaqamo kala duwan leh fursad ay ku wadaagaan hiddo dhaqankooda gaarka ah dadka reer Alberta. Tani waa isdhexgalka dhaqamada oo ficil ah."

Muhammad Yaseen, Wasiirka Socdaalka iyo Isdhexgalka Dhaqamada

Intii lagu jiray wareeggii ugu dambeeyay ee sannad maaliyadeedka 2024-2025, Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan ee Alberta wuxuu ku bixiyay ku dhawaad \$5 milyan 140 kooxood oo bulsho si ay u taageeraan hindisayaal kor u qaadaya wacyiga iyo fahamka isdhexgalka dhaqamada.

Deeqaha laga helo Barnaamijkan waxay taageeraan hay'ado bulsho oo muhiim ah iyo hindisayaal muujinaya oo dabaaldega kala duwanaanta dhaqamada ee Alberta. Barnaamijkan wuxuu caawiyaa hay'adaha si ay u horumariyaan una hirgeliyaan mashaariic kor u qaadaysa ka qaybgalka bulshada ee isdhaafsigaa dhaqamada, sidoo kalena maalgelinaya hindisayaal la xiriira ilaalinta dhaqanka, isdhexgalka bulshada, iyo horumarinta bulshada. Hindisayaashan waxaa ka mid noqon kara xaflado dhaqameed, barnaamijyo waxbarasho, iyo ololeyaal wacyigelin bulsho oo gacan ka geysanaya yaraynta farqiga dhaqameed iyo dhisidda bulsho midaysan oo loo siman yahay.

Miisaaniyadda 2025 waxay la tacaaleysaa caqabadaha horyaalla Alberta iyada oo sii wadeysa maalgelinta waxbarashada iyo caafimaadka, hoos u dhigaysa canshuuraha qoysaska, isla markaana xooga saareysa kobcinta dhaqaalaha.

Xaqiiqooyin degdeg ah

- Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada Kala Duwan ee Alberta wuxuu leeyahay laba qeybood oo loogu talagalay in lagu taageero hindisayaasha ay bulshadu hoggaamiso si loo kobciyo bulshooyin isdhexgal leh oo soo dhawayn leh guud ahaan Alberta.
 - Qaybta 1aad waxay bixisaa ilaa \$50,000 mashaariicda abuuraya fursado isdhexgal dhaqan oo u dhexeeya kooxaha dhaqamada kala duwan iyo kuwa Asaliga ah (Indigenous).
 - Qaybta 2aad waxay bixisaa ilaa \$15,000 mashaariicda abuuraya fursado lagu xusayo laguna dabaaldego kala duwanaanta.
- Waxaa la filayaa in wareegga xiga ee codsiyada deeqaha uu furmo dayrta 2025.

Xogta la xiriirta

- Deeqda Dhaqamada Kala Duwan ([Ethnocultural grant](#))

Weydiimaha warbaahinta

- [Neil Singh](#)

780-422-3559

Xoghayaha Saxaafadda, Wasaaradda Socdaalka iyo Isdhexgalka Dhaqamada